Maxamed Shariif

# Gacalooy!



*Maxamed Shariif*

# *Gacalooy*

**Xuquuqda 2022 Maxamed Shariif**

Lama daabici karo, lama codayn karo, si kalena loo gu ma tagrifali karo. Ilaa idan qoran laga helo allifaha sheekadan.

**Copyright 2022 Maxamed Shariif**

Not part of this publication may be reproduced, distributed, or transmitted in any form or by any means, including photocopying, recording, or other electronical or mechanical methods, without the prior written permission of the publisher.

## — 22-kii Juun

" Gacalo, sidii, iyo iiddii ka dib is ma aannaan heleelin. Waa haddii aan abuuro cudurdaarka aadanuhu doorbido. Se runtii… maya! Ma wanaagsana in aan run ku furfurto dhambaalka. Sababta oo ah, Gacalooy, runta waa la isku nacaa. Niyadda aadanaha waa ku dhib iyo qulub. Xanaf baa ay si u yar lee dahay. La gu ma farxo kolka la hurdo. Qarowguba waa runtii oo aan biyo is marin.

Sababta miyaa aad garanaysaa Gacalooy? Runtu, caddaaladda waa u garab. Caddaaladda lafteeda ayaa dacar ah. Si ay wax waliba isu le'ekaadaan, ayaa halgan nolol la gu waayi karo la isku maqiiqaa. Maxaa u dhintay? Si noloshu isu dheellitirnaanto. Nolol ma u dhigantaa caddaaladdu? Wax uu aadanhu ku garan karo

caqliga uu aadane ku yahay, in uu noloshiisa u waayo ka warran? Soo jiraal aan jihaysnayn ma aha?

Se runtu, waa in fudaydku noqdaa wax aan aadanaha aan geyaysiin waxa ay muhanayaan. Waxa ay jecel yihiin iyo sida ay u jecel yihiin in noloshoodu u noqoto. Runta ayaa ba nolosha caqabad ku ah! Gacalooy, waxa inna ka la baadiyeey waa runtaas. Runta, ayaa inna fartay in aan Bari aado, adna halkaagaas ku negaato. Waa aan og ahay, oo sidii aad ahayd u gu ma negid magaaladii. Magaaladu, qudheedu sidii ma aha. Waxaa dhacay muddadii isbeddel dhan kasta ah. Isbeddelka laftiisa, waxaa keena run aad ogaato. Mise aad dhaqangeliso? Ma garanayo e, miyaanay ku la ahayn Gacalooy in runtu wax walba beddesho?

Sababta aan isu lahaa hadal kooban, oo waqti badan qaadan sheeg, waa maaddaama ay labadii duhurnimo tahay. Maalin dheer ka dib, waa goorta qadada ka dib la indhacasaysto. Waa goorta looma'ooyaanku runta ka nasto. Runta uu habeenkii ku qarwo. Oroortii la niyadxun yahay. Duhurrada iyo goorta milicda, ayaa—sida kuwa ay addoomaha u yihiin—salligooda dhabarka saaraan. Neef buuxda ayaa ay sanbabada ka soo celiyaan. Wajiga ayaa ay u jeediyaan dhanka midig. Si aan kas

ahayn ayaa ay laabta saaraan gacmahooda. Maalinkii oo dhan, laba saacadood ayaa ay dhintaan. Se runta ayaa soo xabaaltoosisa. Sidii ayaa ay haddana isu doorriyaan. Addoonno ku qanacsan xorriyad la'aanta, ayaa ay noqdaan. Dhiiggooda sabab la'aanta u daadta—iyagu sabab qaddar la yidhaa ayaa ay u sababeeyaan. Gaajada boggooda iyo beerkooda isku dhejisay waxa ay ku quudiyaan weedh "waayo adag" la yidhaa. Xuquuqdooda waxa ay u arkaan abaal. Yaa aanaan hadal aan sii ridnayn aan ku daalin Gacalooy e, sabab addoonnimadooda ku sii haysa ayaa ay dhul iyo cirba u maraan. Ka warran Gacalooy sida beentu aadanaha noloshiisa sabab u gu samayso? Aadanaha ay runta is hayaan runtaa farta si uu u la jaalo in uu sabab raadiyo. Sababtaas ayaa run la dhahaa. Soo wax la la dagaallamo ma aha runta baas?

Waxa aan isu lahaa bariido ha u dhaafin, waa maaddaama meesha aan degga nahay la ila deggan yahay. Shan baa aannu qol aad mooddo bakhaar la gu kaydiyo alaabta dhismaha ku deggan nahay. Waa aannu isu wada muuqannaa, aan ka ahayn laabta mid walbaa buur le'eg waxa haysta ay ku gudban tahay. Asal ahaantaba, ma jecli waxyaabaha aan qoro kolka aan dareen hadlayo in uu aadane akhriyo. Waxyaabaha aan

geyin in aad aadane u ga warranto ama uu foolkaaga ka akhriyo waa dareenkaaga. Sababta haddii aad caqliga weyddiiso: adiga uun baa garan kara waxa aad dareemayso. Haddii aan saaxiibbaday u sheego in gaajo aan dareemayo, saaxiibbaday waa ay garan karaan in gaajo i hayso. Se ma dareemi karaan gaajada i haysa sida ay ii hayso. Cunto kasta waa ay i siin karaan si ay gaajada ii ga awddo, se cuntada aan jeclaan lahaa ma garan karaan. Xataa haddii aan u sheego, dan ka ma sii galayaan dooniddayda iyo dareenkayga. Ma fahantay Gacalooy sababta aan sidaas kuu lee yahay? Ma aan illaawin sidii garashadaadu u qoddo dheerayd. In aad sidii tahayna, waa aan rajeynayaa iyo in xaaladdaadu aysan si silloon i su beddelen xataa haddii aad ogaato in runi ay jirto.

Ma kaaga warramaa xaaladdayda? Ma i weyddiisay horta? Ma caksiga haddii ay tahay? Aan kuu yar warramo, oo aan kaaga warrmo bakhaarka aan degga nahay. Mid innaga mid ah baa koonahaa fadhiya. Si baylahsan oo kaladaadsan u hawraara. Macawis dhawaanahanba aan la dhaqin baa ruugaggiisa ka korraysa. Waa uu soo fooraraa, oo gafuurkiisu u dhaw yahay saxan bir ah oo dheeg walba ka diisan oo uu ku jiro bariis karku ka batay.

Gacanta ayaa uu ku soo xantoobinayaa hudhmo aad mooddo canjeelo loo ridqay ilmo ilka la'. Calaacasha dhinacyadeeda waxaa ka dareeraya: wax isaga maraq la ah se biyo kulul oo uskag ah ii la eeg. Afka ayaa uu kalawaaxayaa, oo illaa gawsihiisa aan ilqoodha u ga jeedaa. Intii afkiisu qaadi karayay ma aha e, inta kale waxa ay dib u ga soo daadteen dhabtiisa, dacallada moqrafadda iyo sibidhka wada godka ah.

Waxa sidaa wax u cunaya ma aha ilmo yar ama kuray dibjiray. Waa nin weyn oo gadh iyo dhafoor leh. Dhawr sanno ka hor ayaa ay runtii ka soo barakicisay tuuladii innoo dhawayd ee Koonfur innaga xigtay. Waa nin reer Cago ah, oo Faraha aad ka soo jeeddo iyo Ciddiyaha aan ka soo jeedo ayaa ay ilma'adeer dhaw isku yihiin. Waa taad ogeyd oo reer Ruug iyo reer Bawdo waa tii ay faro ba'an innagu hayeen. Waa kuwii la wareegay saxar kasta oo aannu uunkan ku lahayn. Waa kuwii inna takoori jiray. Waxaas oo dhan waa aad og tahay. Se cadhada ayaa kugu qasbaysa in aad tiriso wixii la gaa galay. Waa in yar oo nafis ah, xataa haddii aadan aargoosanayn. Xataa haddii aannu aargoosonno maxaa soo biiraya? Soo u ma aan cadhoon naf la jaray? Haddaa sidee u gu xasilayaa naf aan jaray? Runta ayaa intaas ii sheegtay, se waa aan liqi la'hay!

Mid kale ayaa koonka ka soo horjeeda koonka uu furaashku ii yaallo ku tukanaya. Maalinkii shan jeer ayaa uu foorfoorsadaa. Marna wax buu hoosta ka quraamaa. Habeen iyo maalin iyo kol la arkaba, waxa uu mashquul ku yahay wax uu meel kale kaga baxsanayo. Kolka uu firaaqo haysto, ee uu afartayadaas inna soo dhex galo waxa uu innagu wacdiyaa wax ku lid ah runta aannu is haynno. Male'awaal aad si u mooddo in uu kaga nasto halganka. Waxa uu innoo sheegaa: in waxani ay tahay adduunyo. Koow. In Muslinka ay u tahay xabsi iyo cadaab. Laba. In aannu aakhiro wax kasta ku helayno. Gartay! Tanna, waa in aynaan isku daalin. Runtii, daroogo uu aad u gu nastay ayaa uu qaataa.

Waxba kuu ka la qaadqaadi maayo mid walba waxa uu gaarka la yahay. Oo la ga yabee in aad ka yara wiswistay kii hore, kan kalena aad la yara yaabtay. Aniga iyo afarta kale ba, waxa aannu is haynaa runta. Waa halganka keliya ee aadanuhu is la qaataan in aysan u kala hadhin. Ma sheegin mid haysta daroogo u sawirraysa nolol kale. Se afarta jiho iyo badhtankaba waa aannu ka halgamaynaa. Se waxa aan u malaynayaa in aannu u go'i doonno halgankaas madhalayska ah. Haa! Waa aan u sheegay in ay isaga hadhaan, oo uu beenta iyo male'awaalka la daaqo sida kaa kale ee i ga

soo horjeeda. Se waxa aan u malaynayaa in ay mayaladaygga u yaqaannaan macangagnimada aannu u naqaanno ragannimada.

Gacalo, ha nixin, oo ha moodin in aan jeel ku xidha nahay. In aan meel qaxoonti ku ahay. Se runtii ayaa i tidhi " Haddii aad caawa geeriyooto, saaxiibbadaa waxa ay u aayi doonaan koodhkaas aad dugsanayso, go'aas huubadu ku dul daatay iyo furaashkaas sagbadda la sinmay." Se sidaas ma aha. Oo waa iska run uun, oo waxaas waa la iska indhatiraa. Xaaladdaas, waa la la qabsadaa. Sababta oo ah keligay ku ma ihi oo, Barigaba sidaas ayaa kor iyo hoosba la isugu muuqdaa. Yaa Gacalooy! Waa iska run oo wax weyn ma aha.

Ka soo tag waxaas oo, sidee meeshii la gu yahay? Aamino, hadalkii ma baratay? Waxaa ii gu dambaysay iyada oo kambadhuudha oo, oohinteedu ay u tahay luuqadda la gu afgarto. Dee hadda weynaatay! Soo ma aha?

Aan si faduulnimo ah wax kuu weyddiiyee, Gacalo, maalinkii tiraba intee ayaa aad i xasuusataa? Isbeddelka foolkaaga waa aan sawiran karaa. Isbeddelkaasi, maxaa uu noqon karaa? Ma mid muuqaygii maskaxdaada ku soo celiyay? Ma fal goonni ah, oo inna dhex maray? Ma

xilli gaar ah, wixii ku duugnaa? Mise waxba? "Waxba" ha i odhan. Se la ga yaabee in runto kugu ilhaamiso in aadan waxbaba xasuusan. Runta si baa aannu cadow iskugu nahay e, ha ii maqlin.

Gacalo, sidii ma tahay? Sidii ma u qalbijilicsan tahay? Muddo dheer ayaa ka soo wareegtay in aan ku dhaygago indhihii goobadaba la ga soo dheegtay. Wajigii abuurkiisa la ga baaraandegay. Timihii dhabarkaaga dugsiyi jiray. Dhererkii iyo jidhkii in aysan is doorin ayaa aan ka baryayaa haddiiba uu i maqlayo. Wanaagsanayaa abuurkaasi! Runtii, waa abuur shaki ku dhaliya wixii aan laabta kuugu hayay. Ma abuurka ayaa aan jeclaaday mise ruuxda jidhkaas? Horta abuurka iyo ruuxdaada maxaa ka dhaxeeya? Waxaasba ka kaalay oo, dareenka aaan laabta kuugu hayo ma jacaylbaa? Dareenkaasi, asalkaba maxaa uu yahay?

Anigu, dareenka aan kuu hayo "Jacayl" ma ku tilmaameen. Runta ma aha e, waxbaa i gu leh ma aha jacayl. Ereygaas "Jacayl" mooyi e, wax kale i la doon laba sababoodba. Horraan: waa magac uu aadanaha oo dhammi u isticmaalo kolka uu dhibirsanaan ama kacsi uu dareemo. Haddii ay doonan waxa ay u gu yeedhaan wax walba oo dhibirsani sawiraya ama wax walba oo

biyadhaciisu yahay kacsi. Ta labaadna: dareen laba qof, oo aadanahaas tirabeelka ah ka mid ah oo aan is aqoon, meel ku wada korin, nolol horena aan is la soo marin; ka dhigi kara aadanayaal  wada jiri kara ilaa ay barbar u dhacaan, ma jacayl uun baa? Runtii, ayaaba xataa i gu diiddan! Wax kasta doone aadanihii i ga horreeyay in ay ku sheegaan. Se Gacalooy jacayl dhaafin waaye, aniguna garan waayay.

Gacalooy, sida aan kaabadda u fadhiyo milicdan meel u fadhiiso. Malee in aad run is haysaan. Malee in aad bartaas aad fadhido, marti aad ku tahay. Malee, wax kasta oo runta kaa hor keeni kara. Ma ku la tahay in aad ka fikiri lahayd wax aniga i gu saabsan? Ma anigu haddii aan kaaga jawaabo? Soo aniga adiga kaa fikiraya, ee dhambaalkan wareersan kuu soo diraya. Ma sidii fannaankii ay runtu inna jaallaysiisay ayaa aan idhaa:

*"Aniguna garaadkay*
*Kaa gaabsan waayaye*
*Adna garashadaadii*
*Ii garaabi waydaye*
*Dhibta aan galaayana*
*Ii gargaari mayside*
*Gudcurkan habeenkii*
*Dhaxanta iyo gawraha…"*

Kuu ma sii wado karo. Waqti ayaa i haya. Kaabadda aan fadhiyona hadhkaa ka sii feydmaya. Milicna ma sii fadhin karo. Nabad iyo in aydin runta kulmin baa aan kuugu tufayaa. Liic oo ha jabin”

Kaaga timid: Gacallahaagii